# WARQADDA SHAQADA EE TAAGEERADA KORSASHADA
## ADOPTION SUPPORT WORKSHEET

Macluumaadkan soo socda wuxuu kaa caawin doonnaa buuxinta xaashidan lagu shaqeeyo ee halkan ku lifaaqan si aad ugu adeegsato Barnaamijka Taageerada Korsashada iyo bixinta macluumaadka ku saabsan baahiyada gaarka ah ee cunugaaga iyo duruufaha qoyskaaga. Fadlan u buuxi xaashida lagu shaqeeyo cunug kasta ee aad u codsaneyso. Marka la dhammeeyo, xaashida shaqada ayaa waxaa dib-u-eegi doona La-taliyaha Barnaamijka Taageerada Korashada.

Fadlan marka koowaad geli magaca cunugga la korsanayo, magacaaga(yadaada) iyo taariikhda aad foomkan buuxinayso.

**QAYBTA 1AAD: BAAHIYADA GAARKA AH EE CUNUGA IYO KHARASHAADKA LA XIRIIRA**

Macluumaadkan soo socda geli:

- **Baahiyada Gaarka ah ee Cunugga iyo Kharashaadka La Xiriira** waa halka aad ku qorayso magaca kharashka la aqoonsadey (sida. Kubadda kolayga, qalabka la qabsiga, qalabka dareenka/iwm.)
- **Kharashka Billaha** waa halka aad ku qorayso kharashka bilaha ah ee la xiriira baahida(yada) gaarka ah ee cunugaaga
- **Qaddarka uu Waalidku Bixiyo** waa qaybta kharashka billaha ah ee uu qoyskaagu awoodo in uu bixiyo korshada ka-dib
- **Qaddarka Caawimaadda La Codsadey** waa qaybta wadarta guud ee kharashka ee uu qoyskaaga codsanayo ee caawimaadda Taageerada Korsashada

Tusaale: Dhakhtar ama xirfadle caafimaadka dhimirka/caafimaadka guud ayaa ku talinaya waxqabadyada manhajka ka baxsan sida casharrada dabaasha, fanka dagaalka ama isboortis si wax looga qabto dhaqdhaqaaqa guud ee cunugaaga, dareenka, xiriirka uu la leeyahay kuwa ay asaaga yihiin ama baahiyada kale ee gaarka ah. Gaar ahaan, cunugaaga wuxuu ku qoran yahay Taekwondo oo $50/bishii ah, iyo kaambka xagaagag ee isboortiska la xiriira $840 ah 8 toddobaad*. Iyadoo miisaaniyadaada lagu saleynyo, waxaad dareentaa qoyskaaga in uu awoodo in uu bixiyo kala-bar qiimaha kharashaadkan, oo codso in Taageerada Korashada ay kaa caawiso nuska kale.

***TALO**: Waxaan ku dhiirrigelinaynaa qoyskaaga in uu fadhiisto oo uu dib-u-eegis ku sameeyo miisaaniyadaada iyo kharashaadkaaga si aad u hesho fikrad macquul ah ee qaddarka kheyraadyada maaliyadeed ee uu qoyskaaga si bille ah u adeegsanayo si uu u taageero baahiyada gaarka ah ee cunugaaga. Waxaan aqoonsanahay in kharashaadka oo dhami ay u dhacaan si bille ah, laakiinse dib-u-eegista iyo ka farka kharashaadka ee sannadka gudahiisa ah waxay kaa caawin karaan in aad ka fikirto kharashaadkaasi ee u dhaca laba-bilood kasta, laba jeer sannadkii, ama keliya hal jeer sannadkii. Tusaalaha kor ku xusan, qoyska wuxuu u qaadan doonnaa $840 oo loo qaybiyay 12 bilood = $70/bil kasta kharashkan.

| **Qaybta 1aad. Baahiyada Gaarka ah ee Cunuga iyo Kharashaadka La Xiriira** | | | |
|---|---|---|---|
| BAAHIYADA GAARKA AH EE CUNUGA IYO KHARASHAADKA LA XIRIIRA | KHARASHKA BIL KASTA | QADDARKA UU WAALIDKA BIXIYAY | QADDARKA CAAWIMAADDA EE LA CODSADAY |
| **Taekwondo** | **$150** | **$75** | **$75** |
| **Kaamka Xagaaga** | **$840/sannadkii = $70/bishii** | **$35** | **$35** |

**QAYBTA 2AAD: KHEYRAADYADA BULSHADA IYO QOYSKA**

Fadlan qaybtan u buuxi sida ugu macquulsan, oo lagu saleynayo waxa qoyskaaga ku habboon. Qaybtan waxaa loogu talagalay in ay bixiso Barnaamijka Taageerada Korsashada oo la socda macluumaad si loo tixgeliyo awoodda guud ee qoyskaaga u leeyahay in uu ka mid noqdo cunuggan gaarka ah gurigaaga korsashada-ka-dib.

***TALOOYIN:**

- Tirada dadka lagu taageero kheryaadyada iyo dakhliga codsadaha waa in *aysan* ku jirin carruur la korsado kasta ee hadda guriga jooga. Cunuga(carruurta) la korsanayo waa in ay ka mid noqdaan.
- Dakhliga guud ee bil kasta waa dakhliga ka hor canshuuraha, caymiska, iyo ka jarid kasta
- Ilaha dakhliga dheeraadka ah waxaa ka mid noqon kara taageerada carruurta, maaliyadaha laga helo dheefaha Damaannada Bulshada ee loogu talagalay adiga naftaada ama cunugaaga(carruurtaada), dheefaha halgamayaashii hore, qofkiiba, iwm.

**QAYBTA 3AAD: CELCELISKA KHARASHAADKA**

Fadlan qaybtan u buuxi sida ugu macquulsan, oo lagu saleynayo waxa qoyskaaga ku habboon. Qaybtan waxaa sidoo kale loogu talagalay in ay bixiso Barnaamijka Taageerada Korsashada oo la socda macluumaad si loo tixgeliyo awoodda guud ee qoyskaaga u leeyahay in uu ka mid noqdo cunuggan gaarka ah gurigaaga korsashada-ka-dib.

- Ku dedaal in aad bixiso qaddarka dhexdhexaadka ah ama saxda ah ee dhammaan kharashaadka go'an iyo kan isbedbeddela ee bil kasta ee qoyskaaga wuxuu mas'uul ka yahay.

- Haddii aad haysato hab kale oo aad ku bixinayso miisaaniyadda qoyskaaga (dokumenti Word ah, dokumenti Excel ah, iwm.) waxaa lagugu soo dhoweynayaa in aad taas ku soo lifaaqdo. Waxaad sidoo kale ku soo lifaaqi kartaa warqad dheeraad ah Xaashida Shaqada Taageerada Korsashada.

## QAYBTA 4AAD: DHEEFAHA LA CODSADEY

Qaybtan, waxaad ku aqoonsanaysaa haddii aad awoodo in aad korsato cunuggan adigoon caawimaad ka helin Barnaamijka Taageerada Korsashada, iyo haddii kale, waa kuwee (4) dheefood ee barnaamijka ee aad codsaneysid. Waxaad awoodaa in aad codsato isku-jir kasta ee dheefaha sida wanaagsan ugu habboon baahiyada qoyskaaga.

Fadlan marka hore aqoonso awoodda aad ku korsaneyso cunuggan adigoon caawimaad ka helin Barnaamijka Taageerada Korsashada. Barnaamijka Taageerada Korsashada ayaa waxaa heli kara qoysaska aanan awoodin in ay korsadaan cunuggan iyadoon caawimaad laga helin barnaamijkan (Qoysaska intooda badani ma awoodaan in ay carruur korsadaan la'aanta ugu yaqaan (1) mid ka mid ah dheefaha la bixiyay).

Fadlan ka-dib aqoonso dheefaha aad codsaneysid:

- **Lacag-bixin kaash ah oo bil kasta ah:** Calaamadee sanduuqa haddii aad codsaneysid, oo tilmaan qaddarka lacagta ee aad barnaamijka ka codsaneyso.
    - Lacag-bixin kaash ah oo bil kasta ah, haddii lagaga gorgortamo, waxaa laga yaabaa in aysan ka badan xadka sharciga ah ee Lacag-bixinta Masruufka ee Taageerada Korsashada.
- **Kharashaadka Aan Soo-noqnoqan:** Calaamadee sanduuqa haddii aad codsaneyso, oo tilmaan qaddarka lacagta kharashaadka aad filayso ee aan soo noqnoqoan ee aad lacag-celinta u codsaneyso (ilaa $1500.00 cunug kasta)
- **La-talin:** Calaamadee sanduuqa haddii aad codsaneyso in lagaa caawiyo la-talin horey loo oggolaadey
    - Dheeftan waxay dad ka caawin kartaa maaliyadda si toos ah loo siinayo qaar ka mud ah kharashka bixiyeyaasha adeegga caafimaadka dhimirka kuwaas oo aan qandaraas la gelin caymiska Medicaid, ama qorshaha caymiska kale ee aad ku dari karto cunugaaga(carruurtaada)
- **Caafimaad:** Calaamadee sanduuqa haddii aad codsaneyso Madaxa XIX ee Medicaid
    - Haddii qoyskaaga uu ku dari doonno cunugga(carruurta) qorshahooda caymiska gaarka loo leeyahay, Medicaid waxaa loo adeegsan karaa sida caymis labaad ahaan

***TALO**: Fadlan ogow in ujeeddada guud ee Barnaamijka Taageerada Korsashada in ay tahay in lagu daro kheyraadyada qoyska, iyo sidoo kale kheyraadyada bulshada, si **loogu caawiyo** daboolidda baahiyada gaarka ah iyo kuwa caadiga ah ee cunugga. Lacag-bixinnada kaashka ah, iyo dheefaha guud, waxay gaar ku yihiin qoys iyo cunug kasta.

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# WARQADDA SHAQADA EE TAAGEERADA KORSASHADA
## ADOPTION SUPPORT WORKSHEET

| MAGACA CUNUGGA | MAGACA WAALIDIINTA KORSASHADA | TAARIIKHDA |
|---|---|---|
| | | |

**Qaybta 1aad. Baahiyada Gaarka ah ee Cunuga iyo Kharashaadka La Xiriira**

| BAAHIYADA GAARKA AH EE CUNUGA IYO KHARASHAADKA LA XIRIIRA | KHARASHKA BIL KASTA | QADDARKA UU WAALIDKA BIXIYAY | QADDARKA CAAWIMAADDA EE LA CODSADAY |
|---|---|---|---|
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |

**Qaybta 2aad. Kheyraadyada Bulshada iyo Qoyska**

Fadlan tax liiska kheyraadyada qoyskaaga uu hadda helayo, ama adeegyada la heli karo, si meesha looga saaro kharashaadka dheeraadka ah ee la xiriira daryeelka cunugaaga. Tusaalooyinka ayaa hoos ku xusan.

| ISHA | QADDARKA |
|---|---|
| ☐ Dakhliga guud ee bil kasta<br>Tirada dadka lagu taageero dakhliga: _____ | $ |
| ☐ Dakhliga Damaannada Dheeriga ah (SSI), Dheefaha Halgamayaashii Hore / Damaannada Bulshada (SSA) | $ |
| ☐ Taakulaynta Carruurta (loogu talagalay carruurta kale ee guriga) | $ |
| ☐ Lacagbixinta Caymiska la Wadaago ee Daryeelka Carruurta ee Xiriirrada Shaqo | $ |
| ☐ Kale: | $ |

☐ Caymiska Caafimaadka Qoyska Qor liiska adeeg-bixiyaha:

☐ Maamulka Naafonimada Koritaanka iyo/ama Daryeelka Shakhsiyeed ee Medicaid

☐ Dhalashada ilaa Saddex / Bilowga Hore / ECEAP / Dugsi-horaadka Koritaanka

**Qaybta 3aad. Celceliska Kharashaadka**

| KHARASHAADKA BIL KASTA | QADDARKA | KHARASHAADKA BIL KASTA | QADDARKA |
|---|---|---|---|
| Guryeyn | $ | Caafimaad | $ |
| Adeegyada korontada, biyaha iyo gaaska / telefoonka | $ | Taakulayn Carruurta | $ |
| Cunto | $ | Deymaha (aan ahayn tan guriga ama kirada) | $ |
| Gaari | $ | Lacag-bixinnada kaarka amaahda | $ |
| Caymis | $ | Daryeelka ku-tiirsanaha | $ |
| Caymiska Caafimaadka ee qoyska | $ | Daryeelka carruurta | $ |
| Kharashaadka waxbarashada | $ | Kale: | $ |

**Qaybta 4aad. Dheefaha La Codsadey**

Taageerada Korsashada waa taageerooyin iyo adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan: Medicaid-ka Madaxa XIX, La-talin Horey Loo Oggolaadey, lacag-celinta Kharashka Aan Soo-noqnoqan, iyo Lacag-bixin Kaashka ah ee Bil Kasta, haddii laga gorgortamey. Miyaad korin kartaa cunugan iyadoon jirin dheefaha Barnaamijka Taageerada Korsashada? ☐ Haa ☐ Maya

Haday maya tahay, fadlan tilmaan dheefahan hoos ku xusan midda aad codsaneyso:

☐ Lacag-bixinta Kaashka ee Bil Kasta ah $______________ (qaddarka la codsadey)

☐ Lacag-celinta Kharashaadka Aan Soo-noqnoqan $________________ (qaddarka lagu qoray codsiga)

☐ La-talin Horey Loo Oggolaadey

☐ Medicaid-ka Madaxa XIX

| SAXIIXA WAALIDKA(IINTA) KORSANAYA | TAARIIKHDA | SAXIIXA WAALIDKA(IINTA) KORSANAYA | TAARIIKHDA |
|---|---|---|---|
| | | | |

**Meel bannaan oo Dheeri ah haddii Loo Baahan Yahay**